

Caawinaad iyo taageero



Haddii adiga ama gabadhaada ay saameyn ku leeyihiin ama aad qatar ugu jirto FGM/C ama CEFM, ama haddii aad ka walaacsan tahay gabar kasta oo halis ugu jiri karta FGM/C ama CEFM una baahan taageero, weydiiso caawimaad.

Haddii aad rabto inaad magacaada qariso, wac taleefanka

Rabshadaha lagula kaco Haweenka

☎ 08000 116 016

Telefoonka caawimaadku waa bilaash in la waco wuxuuna shaqeeyaa 24 saacadood maalintii.

Hadaad rabto inaad heshid talo, fadlan la xiriir

LESSAN e.V. – Be the CHANGEMAKER!

☎ 0176 - 394 519 44

✉ info@lessan.eu

FGM / C iyo CEFM waxay ku banaanyihiin in laga amaansado. Haddii ay kugu kaliftay inaad uga soo baxdid wadankaaga hooyo sababtuna tahay Gudniinka Fircooniga ah ama CEFM oo aad ugu baahan tahay caawimaad habkaaga magangalyo, fadlan la xiriir

PRO ASYL

☎ 069 - 242 314 20

✉ proasyl@proasyl.de

Faahfaahinta meesha lagala xiriirayo



LESSAN e.V. waa urur aan macaash doon ahayn oo kobciya isdhexgalka bulshada iyo xirfadeed ee dadka asal-koodu yahay soogalootiga iyada oo loo marayo mashaariic dhaqan. LESSAN meelaha ugu muhiimsan ee ay diiradda saarayaan waa wacyigelinta iyo tababarka ku saabsan gudniinka fircooniga ah, rabshadaha ka dhanka ah haweenka iyo gabdhaha, iyo cunsuriyada iyo takoorka. Lessan eV waxay kaloo bixisaa caawimaad shaqsiyeed.

🏠 Adenauerallee 10
20097 Hamburg

☎ 0176 - 39 45 19 44

✉ info@lessan.eu

🌐 www.lessan.eu



TERRE DES FEMMES
Menschenrechte für die Frau e.V.

TERRE DES FEMMES – Menschenrechte für die Frau e.V. waa urur macaash doon ahayn oo u dooda xuquuqda haweenka kaas oo taageera gabdhaha iyo haweenka isagoo umaraya u doodista iyo wacyigelinta dadweynaha iyo u ololeynta, isku xirka caalamiga, iyo kobcinta mashaariicda shaqsiyeed. Mawduucyada muhiimka ah ee TDF waa FGM, CEFM, dambiyada sharaf-dhowr darteed loo galo, ka ganacsiga dumarka iyo dhillaysiga, iyo rabshadaha guriga iyo galmada.

🏠 Brunnenstraße 128
13355 Berlin

☎ 030 - 40 50 46 99 0

✉ info@frauenrechte.de

🌐 www.frauenrechte.de



Femmes Entraide et Autonomie (FEA) waa urur aan macaash doon ahayn oo fadhigiisu yahay Faransiiska. FEA waxay ka shaqeysaa ciribtirka dhaqamada waxyeelada leh iyo horumarinta helitaanka xuquuqda, daryeelka caafimaadka iyo adeegyada haweenka iyo dhalinyarada, gaar ahaan kuwa asalkoodu yahay soogalootiga. Hawlaha FEA waxay ku wajahanyihiin soo dhaweynta, macluumaadka iyo jihaynta, sare-uqaadida wacyigelinta iyo tababarka.

🏠 13 Rue de l'Ourcq
75019 Paris

☎ 00 33 7 80 86 87 53

✉ fea.association@gmail.com

🌐 www.facebook.com/FEA

CAAWI CIRIBTIRKA

gudniinka fircooniga/sariibiska iyo guurka da'yarta (caruurta) iyo guurka qasabka ah!



Daabacaaddan waxaa lagu soo saaray iyada oo taageero dhaqaale laga helayo Barnaamijka Caddaaladda iyo Xuquuqda, Sinnaanta, iyo Barnaamijka Muwaadiniinta ee Midowga Yurub. Waxyaabaha ku qoran daabacaadan ayaa ah mas'uuliyadda kaliya ee qorayaasha mana sinaba loo qaadi karo inay ka tarjumaan aragtida Guddiga Yurub. Qorayaasha daabacaadan waxay xubno ka yihiin daladda mashruuca RAGGA U TAAGAN SINNAANTA JINSIGA.



! Haddii aad u baahan tahay caawimaad ama taageero, ha sugin!
Rugaha latalinta waxay awoodaan inay ku caawiyaan.

Khuraafaadka iyo xaqiiqooyinka

ku saabsan gudniinka fircooniga sariibiska (FGM/C)

FGM/C waa shuruud diimeed.

FGM/C wuxuu kordhiyaa dhalmada dumarka.

Waa in aan ixtiraamno dhaqankeena iyo caadooyinkeena.



iyu guurka da'yarta (caruurta) iyo guurka qasabka ah (CEFM)

Markaan gabadhayda guuriyo, waxaan ka ilaalin doonaa shirqoolada galmada.

Guurku waa qaddiyad qoys oo ay tahay inaan faragelin.

Gabdhaha iyo dumarka aan guursan qiimo ma leh.



FGM/C iyo CEFM waa arrimo Dhibaatooyin ah oo ku saleysan Jinsi waxana waajib ah in la Joojiyo.

Ma jirto caddayn ah oo wax diin ah sal ku leh. FGM/C waa caado dhaqameed ka da' weyn dhammaan mabda'yada diimaha.

FGM / C ma kordhiyo dhalmada dumarka. Taas bedelkeeda, **Gudniinka fircooniga ah ayaa bada-naa keena dhibaatooyin** xilliga uurka iyo dhalmada. Wuxuu xitaa u horseedi kartaa dhimashada ilmaha iyo / ama hooyada.

Caadooyin badan ayaa faa'iidooyin u leh badqabka dumarka iyo caafimaadkooda. Laakiin **FGM/C wax faa iido ah umalahan dumarka'caafimaadkood.** Taas bedelkeed, waxay leedahay cawaaqib xumo aan laga soo kaban karin.

CEFM waxay gabdhaha iyo haweenka da'da yar ka dhigeysaa kuwo u nugul inay la kulmaan **rabshadaha sokeeye ee lamaanaha, rabshada guriga** iyo / ama xadgudubka galmada.

CEFM waxay ka reebtaa gabdhaha waxbarashada iyo fursadaha dhaqaale oo waxay khatar galisaa caafimaadkooda iyo badbaadadooda. Haddii aad taqaanid gabar ay saameysay CEFM, waad caawin kartaa oo waad ku hagi kartaa adeegyada taageerada.

Qiimaha haweeneydu kuma xirna xaaladda guur-keeda. Haweeney kasta waa inay xaq u leedahay inay go'aansato inay guursato iyo cidda ay rabto.

FGM/C wuxuu saameeyey Gabdho badan iyo Haween sidoo kale CEFM wuxuu saameeyey ama u nugul Gabdhaha Da'yarta ah iyo haweenba.

Waa maxay gudniinka fircooniga/sariibiska (FGM/C)



FGM/C waa dhaqan ku lug leh beddelaad, beddelo ama ka saarista qayb ka mid ah xubinta taranka haweenka ama gabadha iyada oon loo sababeyneynin sababo caafimaad ama faa'iidooyin caafimaad.

FGM/C waxaa sidoo kale loo yaqaan gudniinka dumarka ama goynta, ama magacyo kale sida sunnah, mknshab, khatna, niaka, tahur, megrez, khatnauracion iyo khitan, iyo kuwo kale.



Ugu yaraan 200 milyan oo haween iyo gabdho ah oo adduunka oo dhan ah ayaa ubandhigmay gudniinka fircooniga /C.¹

¹UNICEF, 2016

FGM/C iyo cawaaqibkeeda

FGM/C wuxuu ku sababaa waxyeelo jireed iyo mid maskaxeed oo daran gabdhaha iyo haweenka, oo ay ka mid yihiin:

- Xanuun joogto ah
- Infekshannada soo noqnoqda, oo u horseedi kara madhalaysnimo
- Dhiigbax xad-dhaaf ah, nabarro waaweynaada iyo boog-hoosaad
- Dhibaatooyinka caadada
- Dhibaatooyinka xilliga uurka iyo dhalmada, taas oo u horseedi karta dhimashada haweeneyda iyo ilmaha
- Dhibaatooyinka xagga galmada
- Dhibaatooyinka kaadida ama kaadida oo aan la xajin karin
- Dareen walwal iyo niyad jab, xusuus dib u soo noqnoqota iyo kalsooni darro

FGM/C iyo sharciga

FGM/C waa Caado xun oo Lagula kaco Haweenka iyo Gabdhaha wuxuna xadgudub iyo meel ka dhac ku yahey xuquuqul insaanka. Waxaa **sharci darro ah** in lagu sameeyo Gudniinka Fircooniga ah gudaha Yurub iyo dibeddaba. Sidoo kale waa sharci daro inaad U diyaarso ilmahaaga in dibedda loo kaxeeyo hawshaa darteed ama in laga caawiyo qof inuu sameeyo gudniinka Fircooniga ah qaab kasta. Ciddii lagu helo midani waxaa lagu ciqaabi karaa xabsi dhowr sano ah / ama ganaax.

Gudaha EU, dhamaan noocyada gudniinka Fircooniga ah waa sharci darro. Dembiilayaasha waa la maxkamadayn doonaa.

Waa maxay Guurka Da'yarta (caruurta) iyo Guurka Qasabka ahi (CEFM)?



Guurka Da'yarta (caruurta) waa guur rasmi ah ama mid aan rasmi ahayn oo mid ama labada dhinacba ay ka yar yihiin da'da 18 sano. Guurka caruurta si aan sinneyn buu u saameeya gabdhaha.

Guurka Qasabka ahi waa halka mid ama labada dhinacba aysan si buuxda ama xorriyad ah u oggolaan guurka, oo cadaadis, hanjabaad, qasab ama rabshad la adeegsado. Guurka ilmaha ayaa had iyo jeer ah guur qasab ah.



In ka badan 650 milyan oo haween ah oo nool maanta waxaa la guursaday iyagoo caruur ah. 39,000 oo caruur ah ayaa la guuriyaa iyagoon raali ka ahayn maalin kasta.²

²WHO

CEFM iyo cawaaqibkeeda

CEFM wuxuu leeyahey cawaaqib xun oo Bulsho iyo mid Caafimaadba waxana ka mid noqon kara:

- Go'doomin bulsho
- Rabshada guriga ka dhacda, jaha-wareer
- Ka tagida dugsiga, taas oo ah mid caadi ah oo keenta waayid waxbarashada, caafimaadka iyo rajada mustaqbalka fog (oo markaa u horseedi karta faqri sii jireen ah)
- Dhibaatooyinka dhalmada ama muddada uurka, taas oo keeni karta dhimasho
- Khatar sare oo ah qaadista cudurada galmada lagu kala qaado (oo uu kujiro HIV)

CEFM iyo sharciga

CEFM waa **ku xadgudub xuquuqda aadanaha** waxaana xarimay sharciga caalamiga ah. Dhowr waddan oo EU ah, oo ay ku jiraan Jarmalka iyo Faransiiska, ayaa horey u **mamnuucay** guurka caruurta. Guurka Qasabka ah waxa uu ka yahey **fal dambiyeed gaar ah** Wadamada qaar ee xubnaha ka ah EU, oo uu ku jiro Jarmalku.

Guurka Caruurta lagusoo meel mariyey dibedda lama aqoonsana waana la tirtiri karaa.

CEFM waxay halis gelineysaa caafimaadka iyo nolasha gabdhaha iyo haweenka iyo sidoo kale rajada mustaqbalkooda.